

WASAARADDA ARR. DD. – Xeerka maamul L. 13

U-wareejinta xagga SANDUUQA Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, xilal, awoodo iyo mudnaan loo aqoonsanaa Bangiga Italiya.

MAAMULAHAA

Markuu arkay sharciga 4 Noofember 1951, lamba. 1301 oo meelmarinaya Mucaahadada Wasaayada, ee xagga Soomaaliya;

Markuu arkay X.M.J. (Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda), ee 9 Disember 1952, lamba. 2357, ee ku saabsan awoodaha maamuus, ee Maamulaha;

Markuu arkay Sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1, oo lagu dhisaayo (dhisaya) Xukuumadda Soomaaliya;

Markuu arkay Xeerka 18 Maajo 1956, lamba. 78 oo oggolaanaya (ansixinaya) Nidaamka Xukuumadda, ee Soomaaliya;

Markuu arkay Amargooyada 16 Maajo 1950, lamba. 14, oo Dhulka Soomaaliya u sameyneysa (u-jideyneysa) lacagta lagu magacaabo “soomaali”, siineysana mudnaanta soosaaridda SAADUUQA xagga Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya;

Markuu arkay X.M.J., 2 Disember 1958, lamba. 1131 oo wax ka beddelaya Xeerka (Dastuurka) SADUUQA Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya;

Markuu arkay warqadda lamba 0016, taas oo uu SANDUUQA Wareegg Markuu arkay a Lacagaha, ee Soomaaliya, ku sheegayo in Golahiisa, kulankiisii 16 Maars 1958, uu góaan ku gaaray in uu Muqdisho ka dhisayo Agaasin Guud, ee uu bangigu yeelanayo, uuna kordhinayo shaqaalihiisa ka hawlgalaya isla magaalada, asaga oo la wareegaya waajibaadka iyo hawlgallada uu ilaa hadda Bangiga Itaaliya ka fuliya Soomaaliya.

Markuu arkay xaashida lamba. 2218, oo taariikh 25 Maars 1959, taas oo ay laanta (faraca) Muqdisho, ee Bangiga Itaaliya, ku sheegeyso in marka la gaaro tarriikhda 4 Abiriile 1959, uu joojinayo dhaqdhaqaaq kasta, asaga oo hawlgalladiisa ku wareejin doona SADUUQA horey loo soo sheegay;

Markuu tixgeliyey in ay lagama maarmaan tahay in SANDUUQA Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya, ayada oo la eego maqaamkiisa cusub oo ah Bangiga Qaranka, ee Soomaaliya, la siiyo hilalka, awoodaha iyo mudnaanta, ee uu horey u lahaa Bangiga Itaaliya;

Markuu dhegeystay Madaxa Xafiiska qorshaynta;

Markuu dhegeystay Guddiga Maamulka;

Soojeedinta Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, is-af-garadna la yeeshay Wasiirka Arrimaha Lacagaha;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERAYAA:

Qod. 1

Laga bilaabo 5ta Abiriile 1959, xilalka, awoodaha iyo mudnaanaha oo uu horey Soomaaliya ugu lahaa Bangiga Itaaliya, waxaa la siiyey SANDUUQA Wareegga Lacagaha, ee Soomaaliya.

Qod. 2

Yeerkan waxa uu dhaqangal yahay laga bilaabo 5ta Abiriile 1959, waxaana lagu nashrinaya Faafinta Rasmga ah.

P- Maamulaha

Francia

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Arrimaha Maaliyadda

Salaad Cabdi Maxamuud

Waa arkay waan Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 15 – xaashi lamba. 198.

Hantidhowraha: **Spadaro**